

[Return location]  
[Return address 1]  
[Return address 2]  
[City state ZIP]



## Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

MM/DD/YYYY

Client name  
Client address  
City, state, ZIP

Waalidka ama mas'uulka qaaliga ah **FIRST\_NAME**,

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) wuxuu ku faraxsanahay in uu ku dhawaaqo bilawga barnaamijka cusub ee Baahiyaha Aan Caadiga Ahayn ee Carruurta. Wuxuu u adeegaa carruurta yar yar ee qabta baahiyaha caafimaad ama hab-dhaqan oo aad u sarreeya. Waxaan filaynaa inaan helno oggolaansho dhanka federaalka ah si barnaamijka loo bilaabo Luulyo 1. Sharciga Senate-ka 91 ayaa faray ODDS in ay abuurto barnaamijkani. Sharci dejinta ayaa barnaamijka ku maalgelisay \$3 milyan oo dollar sanadkii.

ODDS waxay doonaysaa in ay isticmaasho maalgelintani si ay u caawiyo qoysaska ugu badan ee suurtagalka ah. Miisaaniyadani dhexdeeda, barnaamijku wuxuu taageeri karaa 155 carruur ah markiiba.

**Ilmahaagu waxaa dhici karta in uu u qalmo barnaamijkani.** Iyada oo ku saleysan Qiimeyntii Baahiyaha ee Oregon ee u dambeysay (ONA), wuxuu ka tirsan yahay kooxda adeega 5m ama 5b. Tani waxay ka dhigan tahay in la qiimeeyay in uu leeyahay baahiyaha caafimaad ama hab-dhaqan ee ugu sarreeya.

Ilme kasta oo la diiwaan geliyo wuxuu yeelan doonaa ilaa 20 saacadood toddobaadkii oo ah daryeelka waalidka ee lacagta la qaato. Haddii ilmuhu leeyahay wax ka badan hal waalid oo daryeel bixiye ah, waxay kala qaybin karaan saacadaha u dhexeeya daryeel bixiyaasha. Waalidiinta iyo mas'uuliyiintu waa in ay u qalmaan in ay ka dhex shaqeeyaan Maraykanka si ay u bixiyaan daryeelka lacagta la qaato.

## **Nidaamka xulashada barnaamijka**

Waxaa jira qiyaastii 1,500 oo carruur ah oo ay dhici karto in ay u qalmaan barnaamijka. Xulashada barnaamijku waxay noqon doontaa qaab si nasiib ah. Si loo doorto cidda helaysa 155 boos, mid kasta oo ka mid ah 1,500 carruurta ah ee ay dhici karto in ay u qalmaan waxaa loo qoondeyn doonaa lambar nasiib ah. Lambarkani wuxuu noqon doonaa halka uu booskooda kaga jiro liiska.

**Haddii ilmahaagu yahay mid ka mid ah 155 u horreeya ee ku jira liiska, ODDS waxay warqad kuu soo diri doontaa toddobaadka Maajo 20 si ay kuula socodsiiyo.** Warqada waxaa ku jiri doona:

- Macluumaadka barnaamijka
- Tilmaamaha la raacayo si la isku diiwaan geliyo ama in la doorto in aan laga qayb qaadan
- Su'aalaha inta badan la isweydiiyo
- Isbarbardhiga waalid marka loo eego waalid daryeel bixiye ah oo lacag qaata
- Wakhtiga loo qabtay tababarka, iyo
- Taariikhaha kama dambeysta ah.

ODDS waxay sidoo kale u sheegi doontaa isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga wayna kula soo xiriiri doonaan. Waxaad haysan doontaa qiyaastii laba bilood si aad u go'aansato haddii aad rabto in aad isku diiwaan geliso barnaamijka. Haddii aad diido ama aadan soo jawaabin, booska ilmahaaga wuxuu u wareegi doonaa qofka xiga ee ku jira liiska sugitaanka.

**Haddii aan ilmahaaga la xulan, ODDS waxay warqad kuu soo diri doontaa toddobaadka Maajo 28.** Warqadani waxay sharxi doontaa:

- Booska ilmahaagu uu kaga jiro liiska sugitaanka, iyo
- Sida liiska sugitaanku u shaqeeyo.

Sida uu u kala horreeyo liiska sugitaanka isma beddeli doonto. Marka boosasku noqdaan kuwo la heli karo, ODDS waxay la xiriiri doontaa waalidiinta ama mas'uuliyiinta dhalay ilmaha u horreeya ee ku jira liiska sugitaanka. Ka dib marka uu bilaabmo barnaamijku, qoys ama ilme kasta ayaa codsan kara in ay ku soo biiraan liiska sugitaanka. Waxaa lagu dari doonaa dhammaadka liiska sugitaanka.

## Ilaha iyo su'aalaha

Haddii aad hayso su'aalo, fadlan la xiriir isku duwaha adeegyada ee ilmahaaga. Waxaad sidoo kale email u diri kartaa [cenprogram@odhs.oregon.gov](mailto:cenprogram@odhs.oregon.gov).

Si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka, booqo bogga internet-ka ee barnaamijka Baahiyaha Aan Caadiga Ahayn ee Carruurta: <https://www.oregon.gov/odhs/idd/Pages/sb-91-implementation.aspx>.



Waxaad sidoo kale iskaan gareyn kartaa code-ka ku jira qalabkaaga gacanta si aad u booqato bogga internet-ka.

ODDS waxay rajeynaysaa in ay la shaqeyso waalidiinta qaata doorkan cusub.

Si Daacadnimo leh,



Dana Hittle  
Agaasimaha Ku meel gaarka ah  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille, ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811 ama email u dir [dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov](mailto:dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov). Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha, [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).